



## Kormeerka soo socda ee Madaxa Ombudsman-ka

### Hordhac

Madaxa Ombudsman-ka ayaa masuul ka ah kormeerka daaweynta dadka jooga goobaha caafimaadka iyo iinta ee iihayda (detention) – halka dadku aanay awoodin inay ikhtiyaarkooda uga tagaan. Tan waxaa ku jirta gooni-yeelida la maareeyey ee COVID-19 iyo tas-hiilaadka karantiinka.

Madaxa Ombudsman-ku wuxuu u ogolaanayaa kormeerayaashu inay galaan iyaga oo matalaya magaciisa si ay u ururiyaan macluumaad ku saabsan sida goobta la kormeerayaa u ixtiraamto una xafido xuquuqda dadka intay halkaas joogaan.

### Maxaa dhacaya inta lagu jiro kormeerka

Waxaa la malaynayaa in kormeerku qaadan doono ilaa laba saacadood, kooxda yar ee Madaxa Ombudsman-ka oo ah kormeerayaasha ayaa ku dadaali doona in ay yareeyaan wixii carqalad ah.

Kormeerayaashu waxay dhexmari doonaan goobta iyaga oo eegaya sida goobtu u shaqayso. Waxaa laga yaabaa inay garaacaan albaabada qaarkood si ay u arkaan waxay dadku haystaan si fiicana u fahmaan xaalladaha goobta.

Kormeerayaashu waxay u hogaansami doonaan dhamaan shuruudaha caafimaadka iyo amaanka ee goobta, kuwaas oo ay ku jirto qaadashada Qalabka Xafidaada Shakhsiyeed (PPE).

### Sidaad u sheegi karto kormeerka

Dhegaysiga dad lagu hayey gooniyeelid goobaha dadka lagu gooni yeelo ee la maareeyey ama goob karantiin wixii ku saabsan xaalladaha ay ku sugan yihiin iyo sida loola dhaqmay ayaa ah qayb muhiima oo la xiriirta kormeerka Madaxa Ombudsman-ka.

Muddo yar ka dib kormeerka, waxaa loo diri doonaa qoraal iyo/ama email lagu martiqaadayo dadkii ku xirnaa goobta waqtiga kormeerka si ay uga qaybgalaan xog-ururin online-ah oo ku saabsan waxay la kulmeen. Haddii qof meesha ku jiray waqtigaas kormeerka aanu helin martiqaad uuna jeclaan lahaa inuu ka qaybgalo xog-ururinta, waxay awooodaan inay ka codsadaan link iyaga oo ku soo dirayaa [MIQ@ombudsman.parliament.nz](mailto:MIQ@ombudsman.parliament.nz). Fadlan isticmaal khadka mawduuca oo ah 'MIQ Survey'.

Kormeerayaashu waxay kaloo qaadi doonaan waraysiyo gaaban oo ay la yeelanayaan dadkii joogay goobahaasi waqtigii kormeerka, waxayna ku qaadi doonaan telefoon ama zoom mar dambeeto. Haddii aad jeclaan lahayd in waraysi lagula yeesho, fadlan email ugu dir [MIQ@ombudsman.parliament.nz](mailto:MIQ@ombudsman.parliament.nz) ama adiga oo wacaya 0800 802 602. Fadlan isticmaal Khadka mawduuca oo ah 'MIQ interview'. Kormeerayaasha ayaa ku da'daali doona inay fududeeyaan waraysiyada dhamaan kuwa la soo xiriiray.

Macluumaad kasta oo nala siiyey oo qayb ka ah kormeerka waxaa loola dhaqmayaa si qarsoodi ah waxaana loo xafidayaa si amaana. Shakhsiyaadka laguma magacaabay warbixinta ama wixii ka soo baxay Madaxa Ombudsman-ka

Macluumaadka laga ururiyey kormeerka waxaa loo isticmaali doonaa in loogu sheego wixii talo ah Madaxa Ombudsman-ka si loo wanaajiyo xaalladaha iyo dhaqanka goobta ka jira. Wuxuu ka diyaarin doonaa warbixin kormeerka goobta, kaas oo laga yaabo in la daabaco.

## **Dacwooyinka**

Ombudsman-ku wuxuu kormeeraa gooniyeelida la maamulay iyo tas-hiilaadka goobaha karantiinka si looga hortago inuu dhaco xadgudubka xuquuqda aadamiga. Doorkiisa kormeerkaan kuma jiraan qabashada dacwooyin.

Haddii aad qabto dacwo ku saabsan gooniyeelida la maareeyey ama goobta karantiinka, fadlan la xiriiir Maareeyaha Goobta ama Xiriiriyaha Samaqabka. Waxaad kaloo la xiriiri kartaa Gooniyeelida la maareeyey iyo Kooxda Xalalka ee goobta karantiinka adiga oo buuxinaya foomka dawcwooyinka online-ka ah ama wacaya 0800 476 647 (lacag la'aan). Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan habka dacwooyinka, iyo foomka dacwadaha ayaa laga helli karaa <https://www.miq.govt.nz/about/contact-us/complaints-procedure/>.

Haddii aad horay u samaysay tan aadna aamisan tahay in aan si xaq ah hay'ada Dawladu kuula dhaqmin (Sida Wasaaradad Ganacsiga, Hal-abuurka iyo Shaqada ama Wasaarada Caafimaadka) Madaxa ayaa laga yaabaa inuu ku caawimo.

Madaxa Ombudsman-ku wuxuu kaloo awoodaa inuu kaa caawimo haddii aad dalbatay in lagaa dhaaf gooniyeelida la maareeyey, aadna aaminsan tahay in qalad ka jiro habka socodsiinta dalabkaaga. Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan Madaxa Ombudsman-ka ee habka dacwada waxaa laga heli karaa <https://www.ombudsman.parliament.nz/what-we-can-help/complaints-about-government-agencies/how-make-complaint>

## **Macluumaad intaas ka badan**

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan barnaamijyada kormeerka Madaxa Ombudsman-ka waxaa laga heli karaa (<https://www.ombudsman.parliament.nz/what-we-can-help/monitoring-covid-19-managed-isolation-and-quarantine-facilities>).

Haddii aad qabto wax su'aalla oo ku saabsan gooniyeelida la maareeyey ee Madaxa Ombudsman-ka iyo karantiinka goobta ee barnaamijka kormeerka, fadlan email noogu soo dir annaga: ([MIQ@ombudsman.parliament.nz](mailto:MIQ@ombudsman.parliament.nz)). Waxaad kaloo nagala socon kartaa facebook oo ah (@ombudsmannz).